



# DHAQAALAHA SABOOL KA

*"Faham kii akhris keyga"*

## QORAAL KOOBAN

Waxa aan akhriyey Buuggan 12 sannadood ka hor, qoraal kooban oo aan xilligaas ka sameeyey ayaan immika uun dib u heley. Waa muhiim in aad akhrido. Shan sababadood oo saboolku sabool ku yahay iyo waxa la yeelayo

Abdirahman Osman Gaas, PhD.

{إِنَّ اللهَ لاَ يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّى يُغَيِّرُواْ مَا بِأَنْفُسِهِمْ}

# BUUGGA DHAQAALAHA SABOOLKA (*POOR ECONOMICS*)

Buuggan oo la yiraahdo dhaqaalaha saboolka, "Poor Economics" oo aan akhriyey 12 sannadood kahor ayaan maanta dib u fiirshay faham qorkii aan ka sameyey akhrintiisa. Buuggan oo ka dhashay cilmi baadhis ay sameeyeen labada qoraa oo dhaqaale yahanno ah, waxa ay derseen sababta waddamada qaarna u kobcaan dhaqaale ahaan; qaarna saboolka u yihiin. Shantan gabogabo ayay ku soo ururiyeen cilmi baadhistoodii iyo lafagur kii ay ku sameeyeen oo tilmaan buuxda kaa siinaya duruufaha dadka saboolka ah oo intooda badanna aynu Markhaati ka nahay:

1. ***QOFKA SABOOLKA AH XOG LA'AAN AYAA HAYSA:***

   Qofka saboolka ahi ma aaminsana in horumarku dhabyahay: dadka saboolka ah lama siinin xogtii ay u baahnaayeen si ay isbedel u sameeyaan. Tusaale, looma sheegin in ay gacmohooda ku xidhantahay in ay horumar sameeyaan oo ma aaminsana in aqoontooda iyo garashadoodu la mid tahay ta dadka horumaray oo ay noloshooda iyagu gacmahooda wax kaga qaban karaan (*'sacabadaada ayaa biyo lagaga dhergaa'*). *Tusaale kale*, dadka saboolka ah ma helaan xogtii ku habooneyd ee u sheegi lahayd sida ay cunto ku filan ulasoo bixi lahaayeen iyo wax ay u baahanyihiin ama lagama maarmaanka u ah (*ma yaqaanaan inta bacrimiye ee ay u baahanyihiin si ay beer u fashaan*). Waxa ay u haystaan waxtarka aqoontooda iyo garashadoodu in ay ka hooseyso dadka dhaqaalaha leh. Waxa ay intaas raaciyeen qorayaasha buuggu; dadka saboolka ahi marka ay qolka codeynta galaan waxa ay u badantahay in ay u codeeyaan mid ay isku qabiil yihiin, taasina waxa ay ku sii xoojisaa uun kala qaybsanaanta bulshada iyo musuq-maasuqa. Waxa dhab ah in xog yar oo kooban oo dhabnimo iyo daacadnimo ku ladhantahay qofka saboolka ah ka badbaadin karto khataro waaweyn. Xogta dadka saboolka ah loo sheego xilliga ololaha waxa ay u badantahay mid aan sugneyn; xogta lagaga ololeystaana waxa ay u badantahay mid aan sugneyn ama aan ka iman ilo la isku halleyn karo. Xukuumadohooduna awood iyo karti ay kaga ilaaliyaan shacabka in xog khaldan la siiyo malahan.

## 2. *QOFKA SABOOLKA AHI QAYB AYUU KA YAHAY SABOOLNIMADA:*

Ummadda saboolka ahi waa war moogayaal, xilna la is kama saarao, oo halkan ba may joogeen, looma geeyo biyaha nadiifta ah ee dawladdu jeermiska ka dishay, Iyana illeen awoodooda ma garanayaane ma doontaan. Iyaguna iskama nadiifiyaan biyaha ay haystaan inta ay karkariyaan jeermiska kama dilaane wey iska cabaan. Intooda badan ma awoodaan cuntada nafaqada leh ee diyaarsan, iyaguna carradooda wax nafaqa leh kalamasoo baxaan. Ma yaqaanaan sida lacag loo dhigto ama loo kala reebto wixii ku soo gala, sida in aad keyd u dhigato berri, ama hawlgabka xilliga aad noqoto, arrintanina wey ku adagtahay badi dadka saboolka ah, sababtoo ah imika ayayba u baahanyihiin in ay waxa soo gala ee yar isticmaalaan. Nolosha qofka saboolka ahi way adagtahay in uu feker sax ah la yimaado, sababtoo ah waxa laga yaabaa in uu ganacsi yar ku haysto meel tartankeedu aad u sareeyo, ama waa shaqale qaadaa ma dherge ah (yoomiye ah); oo werwerka helidda shaqada tan maanta ku xigta ayaa haya. Dadkan sabool ka ah noloshooda waa in si weyn la isaga xil saaraa iyada oo la qaadayo tallaabooyinkan yaryar: Milixda/cusbada lagu xoojiyey birta iyo macdanta Iodine waa in laga dhigaa wax qofkastaa heli karo oo qaadan karo. Sida lacagta loo keydsado waa in la baro dadkan sabool ka ah, (*ogow in aad barato sida lacagta loo kala dhigto waa dhaqan ee kuma xidhna inta aad lacag haysatid*), loona furo akawn xisaabeedyo u sahlan oo ay si fudud lacagta u dhigan karaan sidoo kalena ugala bixi karaan. Haddii loo baahdo waa in la diyaariyaa bangiga adeegga danyarta IWM. Kalooriin waa in ay tahay wax la heli karo xitaa hadaan biyo qasabadeed oo nafiid ah aanay dadka saboolka ahi gadan Karin.

## 3. *SUUQYADA DADKA SABOOLKA WAXA KA MAQAN:*

Dadka saboolka ahi ma heli karaan bangiyo ay ka amaahan karaan lacago ama u samayn kara maalgelin faa'iidada la saaraa ay tahay mid ay iska bixin karaan. Ma jiro caymis caafimaad oo la siiyo dadka saboolka ah, ama adeegyo caafimaad oo u dhigma. Waa in aynu aqoonsanno mudnaanta ay leedahay in dadkan saboolka ahi illeen war ma hayaane ay ogaadaan duruufaha suuqa yaalla hadayba rabaan in ay ganacsi bilaabaan oo latalin, dhiirigelin iyo taakuleyn ba ay helaan. Suuqyadanuna noqdaa kuwa u kala nidaamsan oo ku habboon dhiirigelinta danyarta.

## 4. *WADAMADA SABOOLKA AHI MA AHAN KUWA GUULDAREYSTAY SABABTA OO AH WAA SABOOL, AMA LAMA ODHAN KARO WAA KUWO NASIIB DARAN:*

Waa dhab in aanay duruufuhu isugu aadanayn waddamadan si ay noloshooda iyagu u maareystaan oo saboolkooda u korsadaan, Hay’adaha wadankooda u dhistaan, ummadoodana u kartigeliyaan si ay gacmahooda ugaga baxaan saboolnimada balse waxa ay u baahanyihiin in lagu caawiyo talo, tamar iyo taageero maaliyadeed intaba. Mashaariicda loogu talo galay in lagu gargaaro wadamadan intooda badan waxa uu ku idlaadaan gacmo aan ku habooneyn sida: Wax barashada oo iga gee uun ah, waddooyinka oo lagu tayo xumeeyo xatooyo loo geysto lacagta loogu talo galay iyo wax yaabo la mid ah. Sababtuna waa mid keli ah oo Haldoor kooda ayaa hagranaya oo dana hooda gaarka ah ka doorbida in dalka iyo dadka la dhiso, saddexda ugu daranna waa: Garasho xumo (*Hogaamin*), fikirid la’aan iyo wahsi.  Tusaale, qofka kalkaaliyaha caafimaad ahi waxa uu qabtaa shaqo qofka caadiga ahi aanu qaban Karin ama u tababa barneyn, balse qofkaas kalkaaliyaha ah ee dadka saboolka ah u shaqaynayaa marnaba ma dhamaystiro shaqada laga rabay in uu bukaanka u qabto. Waxa dhacda in la sameeyo siyaasado iyo xeerar lagu maareeyo duruufaha dadka balse lama waafajiyo nolosha iyo xaaladda wadanka oo si dhab ah loo diraaseeyey ee waxa laga soo deynsadaa meelo kale; dabadeedna waxa la dhahaa uun waanu leenahay (*wakhti lama geliyo samaynta siyaasada lagu dhaqaayo ummadda*). Kacaameyn wakhti kooban ah ayaa bedeli karta duruufaha ummadda oo dhan iyada oo si himileysan oo diraasaysan oo kartiyeysan loo abaabulayo dadka iyo ummadda, sida in aad dadka u abaabusho degsiimooyin, ay aragti samaystaan, ficil ku dhaqaaqaan, si joogto ah isu qiimeeyaan; una xisaabtamaan, dabadeedna u dejistaan yoolal ay noloshooda ku hagaajinayaan oo iyagu masuuliyadeeda iyo himileyn teedaba hayaan. Dawladduna hagid karti iyo han sare u dhisan ummada u abuurto oo si joogteysanna ugu hagto.

## 5. *RAJO DIL IYO NIYAD XUMEYN AYAA HAGAASISA UMMMADA SABOOLKA AH:*

Caruuntu wey ka dhacaan dugsiga marka ay macallimiintoodu (iyo mararka qaar waalidkooduba) u muujiyaan in aanay ku wanaagsanayn wax barashada; khuwa khudaarta

gadaa (*ganacsatada yaryar ayaa laga wadaaye*) kuma bixiyaan dadaal dheeraad ah ka midho dhalinta ganacsigooda; sababta oo ah waxa ay filayaa in aanay horumar sii lahayn (*illeen dhiirigelin la'aan iyo himilo la'aan baa haysee),* kalkaaliyayaasha caafimaadku si joogto ah uma tagaa cusbitaaladda sababtoo ah dad adeegaas ka filayaa ma badna ama ma yaqaanaan xaqooda adeeg raadsasho oo lama xisaabtamaan; Siyaasiyiinta oo aan marka horeba laga filahayn in ay wanaajiyaan nolosha dadka iyaguna iskumaba hawlaan xal raadinteeda. *In filashada dadka aad bedeshaa ma fududa, hadana ma aha wax aan la bedeli Karin*. Si loo muujiyo in isbedelka la samayn karo, waa in hal duruuf la xalliyaa; haba yaraatee, taas ayaana u ah calaamad in wax weynna la bedeli karo oo dadku aaminaan is bedelka.

## *GABA-GABADII:*

Qoraayada Buuggu waxa ay ku soo gabogabeeyeen in ay adagtahay in la ogaado waxkasta oo ku saabsan duruufta saboolka balse buuggani waxa uu bixinayaa casuumadda ah in si dhab ah loo baadho arrintan. Sidan ayayna u dhigeen gabgabdii buugga: Kol haddii aannu u adkeysanay xaalado badan oo qallafsanaa oo u badnaa caqabado si dhab ah u haysta saboolka oo iska caabinaya in la ogaado wax yaabo badan. Kol haddii aannu si dhab ah u dhegeysanay tabashada saboolka, kuna kellifnay nafahayaga in aannu fahamnay caqliyan waxa ay u aanaynayaan in ay sabool noqdaan. Kol haddii aannu ku qanacnay in ay jiraan caqabado si ula kac ah loogu dhigey dadka saboolka ah. Sidaa daraadeed waxa aanu ku qanacnay in loo baahanyahay hoggaamin dhab ah oo dejisa siyaasado ku salaysan duruufaha iyo waaqaca dhabta ah ee dadka saboolka ah. Haddii si dulqaad badan iyo faham qota dheeri ku jiro aynu u maamullo la tacaalidda duruufaha saboolka, waxa dhab ah in aynu ogaanno sida ugu fudud ee looga tallaabsan karo saboolnimada, heer bulsho iyo heer qaran ba.